

BROGRAAMKA KAALMADA RAASHINKA KORONOFIRUS 2



USDA waxay daaqa iyo beeraleydena qaranka siisaa taageero muhiim ah waxaana loo adeegsaday Brograamka Kaalmada Raashinka Koronofirus 2 (Coronavirus Food Assistance Program 2 (CFAP 2)). CFAP 2 waxay kaalmo maaliyad siisaa soo saareyaasha beeraleyda oo suuqa kala kulma carqalad iyo kharashka la xariira taasoo ugu wacan COVID-19.

Kor Ka Eegidda

USDA waxay bilaabi doontaa in ay kaalmo maaliyad dheeraad ah siiso beeraleyda, daaqa iyo soo saareyaasha carqalad kala kulmay suuqa iyo saamaynta COVID-19 lana xariira dadaalka Kaalmada Cudurka ee la siiyo Soo Saareyaasha (Pandemic Assistance for Producers).

Muddada la soo gudbiyo arjiga asalka CFAP 2 waxay dhamaatay Diseembar 11, 2020. USDA waxay dib u furtay isku qoridda CFAP 2 laga bilaabo **Abril 5, 2021, muddo ugu yaraan 60 maalin**. Goor dambe ayaa la soo sheegi doonaa taariikhda ugu dambeeyso.

Yaa Xaq u Leh?

Soo saareyaasha (dadka ama hay'adaha sharciyeysan) ee qaar ka mid ah badeecada beeraha ee sida joogtada ah carqaladeyn kala kulma suuqa iyo kharashka la xariira suuqgeynta waxaa loo ogol yahay lacag bixinta CFAP 2.

Si loogu ogolaado lacag bixinta, qofka ama hay'adda sharciyeysan waa in ay:

- soo gasho dakhli oo marka leysku celceliyo ka yar \$900,000 sanooyinka canshuurta 2016, 2017, iyo 2018; ama
- waa in uu ugu yaraan boqolkiiba 75 dakhliga guud ee leysku celceliyo ka helo beerta, daaqa ama hawlaha la xariira jiqda.

Sidoo kale dadka iyo hay'adaha sharciyeysan waa:

- in ay ganacsi ahaan soo saaraan badeecada la ogol yahay;
- in ay ku jiraan ganacsiga beerta marka ay soo gudbiyaan arjiga;
- in ay u hoggaansamaan qodobada sharciyada "Dhulka La Nabaad Guurin Karo iyo Ilaalinta Dhulka Qoyan" ("Highly Erodible Land and Wetland Conservation"), oo badanaa lagu magacaabo qodobada u hoggaansamida daryeelka;
- haddii qof shisheeye ah, bixiyo dhul, maaliyad, iyo xooggiisa geliyo hawsha beerta; iyo
- in uusan jebinin sharciyada u dagsan maadada la kantaroolo.

Badeecada la beerto ee hoos timaada kunturaadka marka beertaha uu haysto milkiyadda iyo uu qaato halista soo saarka waxaa loo ogol yahay CFAP 2.

Badeecada la Ogol Yahay

Lacag bixinta CFAP 2 waxaa loo qeybin doonaa saddax qeyb oo badeeco ah:

1. Badeecada kicisa sicirka;
2. Dallagga sicirka go'an; iyo
3. Badeecada la iibiyo.

Badeecada Kicisa Sicirka

Badeecada kicisa sicirka waxay hoos u dhacday boqolkiiba 5 ama ka badan marka leys barbar dhigo isku celceliska sicirka todobaadka Janaayo 13-17, 2020, iyo isku celceliska sicirka todobaadka Luulyo 27-31, 2020. Badeecada kicisa sicirka waxaa ka mid ah:

- Sareenta
- Galleyda
- Masagada
- Digirta Soy
- Ubaxa "Sunflower"
- Suufka Upland
- Qamadiga (dhamaan qeybaha)
- Digaagga yaryar
- Ukunta
- Hilibka Lo'da
- Caanaha
- Doofaarka Duurka iyo Qansiirka
- Naylaha iyo Idaha

Dallagga Sicirka Go'an

Dallagga sicitka go'an waa dallagga aan la kulmin kicinta hoos u dhaca sicirka boqolkiiba-5 ama aan haynin xog la heli karo si loo xisaabo isbaddalka sicirka. Dallagga sicirka go'an waxaa ka mid ah, balse kuma eka:

- | | |
|--|-----------------------|
| • Dhirta lagu quudiyo xoolaha (alfalfa) | • Qamadiga Khorasan |
| • Badarka Amaranth | • Mustard |
| • Qamadiga Buckwheat | • Sareenka "oats" |
| • Dhirta "canola" ee laga sameeyo saliidda | • Looska |
| • Suufka Fiidda Dheer | • Miraha "quinoa" |
| • Cagaarka "crambe" (Colewort) | • Miraha Rapseed |
| • Qamadiga Einkorn | • Ubaxa Safflower |
| • Qamadiga Emmer | • Sissinta |
| • Dhirta Flax | • Dhirta Speltz |
| • Dhirta Guar | • Qassabka |
| • Dhirta Hemp | • Dhirta (sugar beet) |
| • Dhirta Indigo | • Bariiska macaan |
| • Bariiska Warshadaha | • Badarka Teff |
| • Dhirta Kenaf | • Dhirta Triticale |
| • Masagada | • Bariiska duurka |

Baddeecada la iibiyo

Baddeecada la iibiyo waxaa ka mid ah:

- Fruttada iyo Khudaarta
- Mallaayga lagu beero jawi la kantaroolo;
- Soo saarka dallagga iyo abuurka ubaxa;
- Xoolaha kale (marka laga reebo xoolaha dhalmada aan ka mid ahayn kuwa kiciya sicirka ee loo dhaqdo raashin ahaan, fiber, dunta, ama baalasha
- Tubaakada;
- Caanaha riyaha;
- Hilib cunaha yaryar (mink) ee ku nool biyaha (ku dar maqaarka)
- Mohair;
- Dhedigga digaagga;
- Darrinta cawska (turfgrass sod);
- Suuf; iyo
- Badeecada kale.

Si aad u heshid liiska dhamaan badeecada la ogol yahay, booqo farmers.gov/cfap.



Badeecada Soo Saaraha Kunturaadka

Badeecada la ogol yahay ee gaar ahaan loogu talagalay soo saareyaasha qaata kunturaadka waxaa ka mid ah:

- | | |
|----------------------------|----------------------------------|
| • Digaagga yaryar | • Boolanboolada |
| • Ilmaha dhedigga digaagga | • Ukunta Digaagga |
| • Digaagga dhalla ukunta | • Doofaarka Duurka iyo Qansiirka |

Badeecada aan la Ogoleyn

Cawska qalalan, lagana reebo dhirta lagu quudiyo xoolaha, iyo dallagga loogu talagalay daaqa looma ogola CFAP 2 mana la siin doono Sidoo kale, lama isticmaali karo dallagga in badan isticmaala diggada cagaaran iyo kuwo meel lagu dhaafo. Badeecada aan la ogoleyn xagga CFAP 2 waxaay ka mid ah, balse kuma eka:

- | | |
|---|--|
| • Dhirta soo baxda sannadkii hal mar sida "birdsfoot iyo Trefoil" | • Cawska Lespedeza |
| • Heelka | • Dhirta Milkweed |
| • Daggalka Heelka | • Daaqa Isku Qasan |
| • Gabal dhul ah | • Maqaarka (marka laga reebo hilib cunka ku nool biyaha) |
| • Masagada daaqa | • Looska soo baxa sannadkii hal mar |
| • Digirta daaqa | • Qaadeyaasha |
| • Beeraha (ganacsiga iyo guriga) | • Dhirta Sunn Hemp |
| • Cawska | • Miraha dallagga aan la ogoleyn |
| • Dhirta Kochia (protrata) | • Daaqa Vetch |

Lacag bixinta

Maaliyadda CCC waxaa loo isticmaali doonaa in qeyb ahaan loo magdhawo soo saareyaasha kuwa la kulma carqaladeynta suuqa iyo in lagu kaalmeeyo kala guurka siistemka suuqgeynta. Maaliyadda Sharciga Dastuurka CCC (CCC Charter Act) looma isticmaali karo in lagu kaalmeeyo tubaako; hase ahaatee, tubaakada waa loo ogol yahay CFAP 2 marka la isticmaalo maaliyadda hartay Sharciga CARES (CARES Act). Waa la hayn doonaa lacagaha tubaakada ee la xariira arjiyada CFAP 2 ee la baddalay ama cusub muddo gaaban.

Dagalka Kiciya Sicirka

Lacag bixinta badarka sareenta, galleyda, masagada, digirta soy, ubaxa "sunflower", suufka dhulka kore, iyo qamadiga (dhamaan darajooyinka) waxay ku saleysnaan doonaan akarada (acres) la ogol yahay 2020, sida lagu sheegay FSA, foomka FSA-578, marka laga reebo abuurista iyo akarada (acres) tijaabada.

Lacagaha laga bixiyo dallagga kiciyo sicirka waxay ahaan doonaan hadbka midkii badan:

1. akarada (acres) la ogol yahay lagu dhuftay lacag bixinta \$15 halkii akre; ama
2. akarada (acres) la ogol yahay lagu dhuftay boqolkiiba suuqgeynta daggalka qaranka, lagu dhuftay lacag bixinta uu gaarka ah dagalka, kaddibna Taariikhda Soo Saarka Dhabta ah 2020 (2020 Actual Production History) (APH) oo miisaaman lana ogolaaday. Haddii aan la heli karin APH, boqolkiba 100 Ceymiska Halista Beeridda 2019 - Fursadda Dagmada (2019 Agriculture Risk Coverage-County Option) (ARC- CO), waxaa la isticmaali doonaa soo saarka bartilmaameedka dallaggaas.

QADARKA LACAG BIXINTA DAGALKA KICIYA SICIRKA			
BADEECADA	HALBEEGA CABBIRKA	SUUQGEYNTA DAGGALKA BOQOLKIIBA (%)	QADARKA LACAG BIXINTA (\$/HALKII)
Sareenta	mugga lagu cabbiro waxyaabaha adag (bushels)	63	\$0.54
Galleyda	mugga lagu cabbiro waxyaabaha adag (bushels)	40	\$0.58
Suufka, Upland	bound	46	\$0.08
Masagada	mugga lagu cabbiro waxyaabaha adag (bushels)	55	\$0.56
Digirta Soy	mugga lagu cabbiro waxyaabaha adag (bushels)	54	\$0.58
Ubaxa Gabal Sunflower	bound	44	\$0.02
Qamadi (Dhamaan)	mugga lagu cabbiro waxyaabaha adag (bushels)	73	\$0.54

Digaagga Yaryar iyo Ukunta

Xagga digaagga yaryar, lacagaha waxay la ekaan doonaan boqolkiiba 75 soo saarka digaagga yaryar ee soo saaraha 2019 lagu dhuftay qadarka lacag bixinta \$1.01 halkii shimbir (madax).

Lacag bixinta ukunta waxay la ekaan doontaa boqolkiiba 75 soo saarkia ukunta 2019 ee soo saaraha lagu dhuftay sicirka lacag bixinta CCC.

QADARKA LACAG BIXINTA DAGALKA KICIYA SICIRKA		
BADEECADA	SUUQGEYNTA DAGALKA BOQOLKIIBA (%)	QADARKA LACAG BIXINTA (\$/HALKII)
Qolofa Ukunta	darsan	0.05
Dareeraha Ukunta	bound	0.04
Ukunta la Qalajiyay	bound	0.14
Ukunta la Qaboojiyay	bound	0.05

Caanaha

Lacag bixinta caanaha (caanaha lo'da) waxay la ekaan doontaa iskudarka sida soo socoto:

- Wadarta caanaha dhab ahaan la soo saaro laga bilaabo Abriil 1, 2020, ilaa Agoosto 31, 2020, lagu dhuftay sicirka lacag bixinta \$1.20 halkii miisaanka boqol (hundredweight) iyo
- Soo saarka caanaha la qiyaasay ee soo saaraha caanaha laga bilaabo Sateembar 1, 2020, ilaa Diseembar 31, 2020, lagu dhufto qadarka lacag bixinta \$1.20 halkii miisaanka boqol. FSA waxay qiyaasi doontaa soo saarkan taasoo ku saleysan soo saarka isku celceliska maalinimada ee soo saaraha laga bilaabo Abriil 1 ilaa Agoosto 31, 2020, lagu dhuftay tirada maalmaha hawsha caanaha ay ganacsi ahaan suuq geyso caanaha laga bilaabo Sateembar 1, 2020, ilaa Diseembar 31, 2020.

Hawlaha caanaha ee soo dalbada CFAP 2 waa in ay yahiin kuwo ka shaqeeyo soo saarka iyo suuqgeynta caanaha marka ay soo dalbadaan. Hawlaha caanaha ee ku milma ama horay u milmay bisha Sateembar 1, 2020 ama kaddib waxaa loo ogol yahay in xisaabinta laga soo bilaabo gadaal, tirada maalmaha hawlaha hawsha suuqgeynta caanaha laga bilaabo Sateembar 1, 2020 ilaa Diseembar 31, 2020.

Xoolaha Kiciya Sicirka

Xoolaha kiciya-sicirka, lacag bixinta waxay ku saleysan tahay tiro go'an xoolaha, taasoo lagu sifeeyo hadba midkii yar:

- tirada midka ugu badan xoolaha loo ogol yahay, marka laga reebo xoolaha tarma, taariikhda uu xusho soo saaraha loo ogol yahay laga bilaabo Abriil 16, 2020, ilaa Agoosto 31, 2020; ama
- tirada ugu badan xoolaha hadba nooca u dagan USDA.

QADARKA LACAG BIXINTA XOOLAH KICIYA-SICIRKA		
BADEECADA	SUUQGEYNTA DAGALKA BOQOLKIIBA (%)	QADARKA LACAG BIXINTA (\$/HALKII)
Hilibka Lo'da	madax	\$55
Doofaarka Duurka iyo Qansiirka	madax	\$23
Naylaha iyo Wanka	madax	\$27

Lacag Bixinta Dheeraadka ee la Siiyo Soo Saareyaasha Lo'da

Sharciga Isugeynta Miisaaniyadda (Consolidated Appropriations Act) ee 2021 wuxuu bixiya kaalmo CFAP dheeraad ah oo la siiyo soo saareyaasha xoolaha. Lacag bixintaan waxay la'eg tahay tirada xoolaha ku jira xisaabta inta u dhexeysa Abriil 16, 2020 ilaa Maajo 14, 2020.

Soo saareyaasha xoolaha ay CFAP 1 ogolaatay arjiyadooda waxay toos u qaadan doonaan lacag bixintaan.

Waxaa la isticmaali doonaa sicirada lacag bixinta soo socota:

BADEECADA LA OGOL YAHAY	QADARKA LACAG BIXINTA
Lo'da Quudinta: In ka yar 600 Bound	\$7/halkii
Lo'da Quudinta: 600 bound	\$25,50/halkii madax
Lo'da la Qalo: Lo'da la Quudiyay	\$63,00/halkii madax
Lo'da la Qalo: Qaangaarka	\$14.75/halkii madax
Dhamaan Lo'da Kale	\$17.25/halkii madax

Daggalka Sicirka Go'an

Dallagga sicirka go'an, lacag bixinta waxaa lagu xisaabin doonaa marka qeybta soo saaraha dhufto akarada (acres) dallagga la abuurray sida la soo sheego ama la ogaado 2020, lagana reebo akarada (acres) la abuurray iyo la tijaabiyay, lagu dhufto \$15 halkii akar (acre).

Baddeecada la Iibiyo

Tan ku saabsan iibinta badeecada, lacag bixinta waxaa lagu xisaabin doontaa marka la isticmaalo habka ku saleysan iibinta taasoo ku saleysan shan darajo oo lacag bixin ah lana xariira iibka soo saaraha 2019 ee badeecada iyo dallagga oo laga badbaadiyo khasaarada, Brograamka Kaalmada Musiibada Dallagga aan Ceymiska ku Jirin (Noninsured Crop Disaster Assistance Program) iyo Brograamka Dheeraadka Ka-Badbaadinta Khasaarada Dabka Duurka iyo Daluuliyaha (Wildfire and Hurricane Indemnity Program Plus) lacagaha laga bixiyo dallagga sannadka 2019.



SICIRKA LACAG BIXINTA EE LOOGU TALOGALAY BADEECADA LA IIBIYO

BAAXADDA IIBKA 2019	QODOBKA LACAG BIXINTA BOQOLKIIBA
Ilaa \$49,999	10.6
\$50,000-\$99,999	9.9
\$100,000-\$499,999	9.7
\$500,000-\$999,999	9.0
Dhamaan iibka ka badan \$1 malyan	8.8

Tusaale: Wadarta iibinta soo saaraha badeecada la ogol 2019 waxay ahayd \$75,000, Lacag bixinta waxaa lagu xisaabaa in ay tahay (\$49,999 lagu dhuftay 10.6%) lagu darray (\$25,001 lagu dhuftay 9.9%) waxay la'eg tahay wadarta lacag bixinta \$7,775.

Xisaabinta lacag bixinta Soo Saareyaasha Kunturaadka:

Dakhliga la ogol yahay la qaatay laga bilaabo Janaayo 1, 2019 ilaa Diseembar 27, 2019

— **Dakhliga la ogol yahaye** ee la qaatay laga bilaabo Janaayo 1, 2020 ilaa Diseembar 27, 2020

Kala duwanaanta dakhliga la ogol yahay X 80%

Lacag bixinta dheeraadka ee la Siiyo Soo Saareyaasha Safka-Daggalka

Sharciga Miisaaniyadda Leysu Geeyay 2021 (Consolidated Appropriations Act 2021) wuxuu bixiyaa kaalmo CFAP dheeraad ah oo loogu talagalay soo saareyaasha dallagga kixiya sicirka iyo kuwa sicirka go'an. Lacag bixintaan waxay la'eg tahay qiyaasta dhulka (acre) loo ogol yahay dallagga lagu dhuftay lacag bixinta \$20 halkii "acre." FSA waxay toos lacago u siin doontaa soo saareyaasha xaq u yeesho sida ku saleysan akarada (acres) la ogol yahay ee ku qoran arjiyadooda CFAP 2. Soo saareyaasha loo ogol yahay ee horay u soo dalabaday CFAP 2 uma baahna in ay soo gudbiyaan arji cusub si ay u qaataan lacag bixintaan.

Soo Saareyaal Cusub Sanadka 2020

Lama xisaabin karo lacag bixinta marka la isticmaalo hababka lagu sifeeyay kor ee la xariira soo saaro digaagga yaryar, ukunta, iyo badeecada la iibiyo ee bilaabay beeridda sannadka 2020 balse aan waxba soo saarin ama iibinin 2019.

Lacagaha la siiyo soo saareyaasha waxay ku saleysnaa doonaan soo saarka dhabta ah ee 2020 ama iibka laga bilaabo taariikhda soo saaraha gudbiyo arjiga lacag bixinta.

Soo Koobidda Lacag Bixinta

Lacag bixinta CFAP 2 waxay hoos imaan doonaan soo koobidda halka qof iyo hay'adda sharciga ilaa \$250,000. Soo koobiddaan waxay quseysaa wadarta xisaabta lacag bixinta CFAP 2 ee dhamaan badecada la ogol yahay.

Sida ka duwan brograamyada FSA, ka-qeybgaleyaasha waxaa lagu dabaqaa sharciyo khaas ah oo soo kooba lacag bixinta, waa shirkadaha, shirkadaha ilaa xad wax lagu sheegan karo (limited liability companies), iskaashiga kooban (limited partnerships) (hay'adaha la leeyahay), ammaanada, iyo hantida maguuraanka. Hay'adahaan sharciyeysan waxay qaadan karaan ilaa \$750,000 taasoo ku saleysan tirada xubnaha (in aysan ka badanin saddax xubin) uu mid kasta ku biiriyo ugu yaraan 400 saac hawsha qofka ku biiriyo ama maamulka qofka ku biiriyo.

Hay'adda sharciga:

- Marka la soo qaado hal xubin, lacag bixinta shayga waa \$250,000;
- Marka la soo qaado labo xubin, xadka lacag bixinta hay'adda waa \$500,000 haddii ugu yaraan labo xubin ay ku biiriyaan ugu yaraan 400 saac oo ah shaqada qofka ama maamulka qofka, ama isugeyntooda, lana xariirto hawsha ay qabato shirkadaha la leeyahay (corporate entity); iyo
- Marka la soo qaado saddaxda xubin noocaas, xisaabta ugu badan \$750,000 haddii ugu yaraan saddax xubin ay wax ku biiriyaan ugu yaraan 400 saac oo ah shaqada uu qofka qabto ama maamulka qofka, ama isugeyntooda, xagga hawl-galka hay'adda.

Xadka lacag bixinta CFAP 2 waa ka baxsan yahay lacag bixinta CFAP 1

Natiijada ka soo baxday kaalmada dheeraadka ee la siiyay safka-dallagga iyo soo saareyaasha lo'da, arjiilaha CFAP ee ah shirkad, shirkadaha waxa lagu sheegan karo kooban (limited liability corporation), iskaashiga kooban (limited partnership), ammaanada (trust), ama hantida maguuraanka (estate) waxay fursad u heli doonaan raadinta kor u kaca lacag bixinta \$250,000 la siiyo xubnaha hay'adda ee wax ku biiriya ugu yaraan 400 saac maamulka shaqada qofka, in aysan ka badanin ugu badnaan saddax xubin. Wakiilka loo fasaxay in uu mattalo hay'adda sharciyeysan waa in uu la xariiro shaqaalaha FSA ee deegaanka so loo badallo CFAP 1 ee horay loo soo gudbiyay. ama 2 arji.



Xaggee loo Gudbiyaa Arjiga

Shaqaalaha FSA ee ka shaqeeyo Xarunta Adeegga USDA (USDA Service Center) waxay la shaqeyn doonaan soo saareyaaha si ay u soo gudbiyaan arjiyada. Arjiyada waxaa la lagu soo gudbin karaa boostada, faks, waxaa lagu keeni karaa gacanta, ama habka elataroonigga. Fadlan wac xafiiskaada ka hor inta aadan elataroonig ahaan ku soo dirin arjiyada.

Arjiga CFAP 2 iyo foomamka la xariira waa laga heli karo internetka farmers.gov/cfap.

Yaa loo Baahan Yahay in la Waco

Waxaa dheeraad ah, in soo saareyaasha daneeya in qof-qof looga kaalmeeyo arjiga CFAP 2 waxay la xariiri karaan xaruntena la soo waco, telefoonka **877-508-8364** si ay toos ula hadlaan shaqaalaha USDA una bixiyaan kaalmo.

Macluumaad badan

Warqadaan xaqiiqada waxaa loogu taloglaay in laga qaato macluumaad; waxaa dhici karto in ay jiraan waxyaabo kale oo xaddidan. Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan brograamka CFAP, booqo farmers.gov/cfap ama la xariir xafiiskaada FSA ee deegaanka. Si aad u heshid xafiiska FSA ee deegaanka, booqo farmers.gov/service-locator.